

Ila soo xidhiidh

**Su'aalo Degdeg ah
Ama cabashooyin**
Telefoonka caafimaad
ee Kalkaalinta
651-229-3890

**Su'aalo Kale
Oo ku saabsan
Daryeelkaaga**
Rugta bukaanka St. Paul:
Khadka Wicitaanka
Kalkaalisaada
651-578-5000

Bukaanada jooga Goobaha
Kale:
Kala xidhiidh lambarka
Kooxdaada daryeel
caafimaad Gillette.

Ballamo
651-290-8707

Muhiim ah in la ogaado

Waalidka, masuulka sharci
ama daryeel bixiyaha u
baahan la jooga bukaan
jiifka wakhti walba.

Buugaag, DVD-yo iyo kabadan

Raadi qalabka ku saabsan
Naafada, xaaladaha caafimaad
Iyo taageerada daryeel bixiyaha.

**Khayraadada caafimaad iyo
Waxbarasho**
dhismaha jaamacadda St. Paul, ee
u dhaw dabaqa afaraad skyway
651-229-3938
hre@gillettechildrens.com

Tilmaamaha Fiidyowga EEG

Video EEG Instructions | Somali

waxbarashada bukaanka
PTT034-SO

Qodobada Muhiimka ah.

▪ U keen alaabta Gillette uu ilmahaagu xiiseeyo, sida caagaga, ciyaaraha ama guuggaag.

▪ U keen dhar raaxo leg, gaar ahaan shaadhahka ku leh badhamada xaga hore.

Ujeedada fiidyowga EEG waa in lala socdo aragga mowjadaha maskaxda carruurta, oo keliya marka carruurta leeyihiin "walbahaar maskaxeed" iyo sidoo kale markaanay lahayn. EEG waxa la aqoonsadaa nooca walbahaarka maskaxda ee ilmaha. Marka lagu daro la socodka, waxaanu dhignaa kamarad dusha bukaan jiifka si aanu u aragno dhaqanka iyo/ ama dhaqdhaqaaqa jidhka aanu uga shakino in ay tahay walbahaar xaga maskaxda ah. Fiidyow EEG waxa uu u baahan karaan joogitaan bukaan jiif ah oo cusbitaalka ah, iyaddoo ku xidhan inta ay leegatahay ee la qorshayey la socodku. Inta lagu jiro baadhida, fiidyowga iyo duubista maqalka ah waxay ka dhacaan qolka bukaan jiifka. (Ma duubno xamaamka.)

Waxaanu u Baahanahay in aanu Ogaano

1. Hore u sii diiwaan gasho adoo wacaya diiwaangelinta bukaan jiifka lambarkan 651-726-2897.
2. Uga warbixi si toos ah goobaha caafimaad ee baadhida (dabaqa 4aad ee St. Paul campus).
3. Ilmaha waa in uu laha daa waalid, masuul sharciya, ama daryeel bixiye la socda wakhti kasta inta ay joogaan cusbitaalka.
4. Timaha ilmaha waa in ay qalayl ahaadaan loo mariyay shaambooo habeenka ka horaysa la socodka. Ka ilaali isticmaalka waxa lagu buufiyi timaha ama saliid.
5. Ilmahu waa in uu cunaa quraac oo qaata dhammaan daawooyinka ka hor intaanu iman cusbitaalka, ilaa tan ay u sheegaan daryeel bixiyaha amraya mooyee.
6. Iska hubi in aad raacdo hurda la'aanta tilmaamaha haddii la amray.
7. Wac shaybaadhka EEG 651-726-2885 haddii aad tirtirayso ama jadwal dib ugu samaynayso.

Fadlan Keen

- Cunto carruurteed gaar ah oo ilmahaagu isticmaalo.
- Dhammaan dawooyinka uu ilmahaagu caadi ahaan qaato.
- Waxa ilmahaagu xiiseeyo, sida caagaga uu doorbido, xawayaano cabbaysan, buugaag, shaqada dugsiga, gaymka, cajaladaha fiidyowga, gaymka fiidyowga. Waxaanu bixinaa TFii iyo waxoogaa filimo ah, iyo caagag.
- Maryaha raaxada oo badhamo leh shaadhka ugu fiican. Marka ilmahaaga lagu xidho qalabka la socodka, way adag tahay in wax laga soo saaro dusha madaxiisa ama madaxeeda.
- Haddii aad umalaynayso in walbahaarka maskaxdu uu dhaco inta badan marka ilmahaagu ka shaqaynayo layliska, fadlan u soo qaado waxoogaa ilmahaaga si uu uga shaqeeyo inta duubidu socoto.
- Faahfaahinta nooc kasta oo ah walbahaarka maskaxda ee ilmahaagu leeyahay. Waxaanu bixin doonaa foom kaas oo lagu qorayo walbahaarka maskaxda. Haddii ay jiraan dhowr nooc, waxaa dhici karta in aad doonto in aad iyaga qorto ka hor wakhtiga. Waxaad siin kartaa calaamad, sida Walbahaar A, Walbahaar B iyo wixii la mid ah. Tan waxay u fududaysaa warqada walbahaarka maskaxda markay dhacaan duubitaanka EEG, oo waxay kaa mamnuucdaa adiga qorista faahfaahinta wakhti kasta ay dhacdo walbahaarka maskaxdu.

Socda bogga xiga

Shuruudaha Fiidyowga Guul leh Duubida EEG

Si aad u habsato la socodka EEG in ay guul leedahay, waxaanu u baahanahay in aanu samayno duubida ugu fiican ee suuragalka ah. Waa in aad samayso ta soo socota:

- Haddii ay suuragal tahay, waalidka ama daryeel bixiyahu waa in uu raacaa caruurta inta uu socda habka fiidyowga EEG oo dhan. Samayntaas waxay caawisaa in dhacdooyinku ay waalidku u fekeraanin walbahaarka maskaxdu la duubo ama xog laga qoro.
- Isku day kasta samee si aad u hubiso in ilmahaagu uu eegaya kamarada wakhtiyadoo dhan, xataa marka uu ilmahu hurdo. Isku day in aan la xanibin kamarada markaad ilmaha la joogto. Daboolida ilmaha keliya waxa raaxo gelinaya waxay noo ogolaan doontaa anaga in aanu si cad u aragno dhaqdhaqaaada jidka ee ilmahaaga.
- Ilmahaagu waa in aanu calaalin xanjo ama buskud inta duubista.
- Ilmahaagu waa uu ka qayb qaadan karaa ciyaarta caadiga ah, oo waxa uu cuni karaa caadi goorta daawashada fiidiyaha EEG. Si kastaba ha ahaatee, dhaqaaqa si yar ayuu xadidnaan doonaa maxaayeelay ilmahaagu waxa uu ku xidhnaan doonaa qalabka la socodka. Haddii ilmahaagu uu ka soo kaco sariirta oo uu awoodo in uu tago qolka ciyaarta ama ka qayb galo hawlaha kooxda galabta, amar qoran oo uu sameeyay dakhtarka/ama kalkaalisa goobta caafimaad ayaa u ogolaan doonta isaga ama iyadda in ay sidaas samayso ilaa hal saacadood qayb kasta. OGOW: Ilmahu kuma jeedo kamarada markan, sidaas darteed hawlahaan waa in la yareeya.
- Haddii walbahaarka maskaxdu ay yihiin ku dhaygag ah, markaa daawashada TFiiga ciyaaranteed waa in la xadidaa ilaa 20 miridh. Isku day in wiilkaagu sameeyo hawlaha inta la gu jiro marka ay walbahaarkaasi dhici karo.

Marka la ogaado walbahaar maskaxeed:

1. Cadaadi batanka duubida.
2. Daboolka ka qaad ilmahaaga oo dhaqaaji wax kasto oo xanibi kara aragtida kamarada.
3. Shid korontada qolka.
4. Duub walbahaarka maskaxda dhacdana duubida sariirta dhinaceeda. Qor:
 - Wakhtiga bilowga (isticmaal saacad wakhtiga ee EEG mashiinka).
 - Dhererka walbahaarka maskaxda.
 - Wax kastoo aad uga fekerto in uu kiciyay walbahaarka.
 - Dhaqaaqa jidhka lagu arko inta lagu jiro walbahaarka maskaxda - habka u dhaceen.
 - Sida ilmahaagu noqday ka dib walbahaarka maskaxda.

Tani haddii ay tahay nooca caadiga ah ee walbahaarka ilmahaaga, waxaad faahfaahin kartaa walbahaarka(da) duubitaan kale oo waxaad ku calaamadin kartaa Walbahaar A, Walbahaar B, iyo wixii la mid ah.